

Xeer-sharci 6 luulyo 1964, L. 7

Ilaalada mutadhawiciinta ee gobolka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

MARKUU arkay qodobbada 15 iyo 63 ee dastuurka;

MARKUU tixgeliyay qodobka 13-aad ee xeerkii 3dii juun 1962, n.14 «nidaamka dawladda»;

ASAGOO tixgelinayo, ka dib markii uu dhacay xeer-sharci ee 28-kii march 1964-kii no. 3 ee asaasidda ilaalada mutadhawiciinta ee gobolka;

MARKUU arkay in ay tahay lagama maarmaan oo degdeg ah in la soo saaro xeerar cusub oo la xiriira arrinta;

MARKUU dhagestay golaha wasiirada;

MARKUU arkay soo jeedinta wasiirka gaashandhigga, oo la tashaday wasiirka maaliyadda;

Wuxuu xeeriyyay

Qod. 1

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo lagu dhawaqaqay khatar dagaal ama gardaro dibadeed awgeed, wasiirka gaashaandhigga markuu la tashado golaha wasiirrada wawa uu xaq u leeyahay in uu awood u siiyo taliyaha ciidanka qaranka in uu hubbeeyo oo si mutadawacnimo ahna ugu shaqaaleyo hawlahaa ciidammada muwaadhiniinta oo si mutadhwacnimo isu soo bandhigay si ay uga qayb qaataan difaaca xuduudaha qaranka.

Qod. 2

Kooxda muwaadiniinta hubaysan, muddada hawlahooda oo dhan waxay qaadanayaan magaca ilaalada iskaa wax u qabso ama mutadhawiciinta ee gobolka oo ilaalinaya xuduudaha.

Qod. 3

Diyaargaroobidda muwaaddiniinta mutadhawaca ah waxay ka dhaceysaa gobol kasta gudihiisa oo uu ku yaallo xafiiska abaabulka oo laga dhex sameeyay xaruunta ciidan kasta.

Bilowga iyo qaabka ay u iso diyaargaroobayaan waxaa la ogeysiin doonaa dadweynaha iyadoo loo marayo qaabka uu guddoomiyaha gobolka wax u ogaysiyo dadka, lana raacayo qaabka uu maamulku kula galo heshiisyada maamulka ciidamada ee deegaanka.

Qod. 4

Mutadawiciinta ayaa u soo diyaar-garoobayo maamulka ciidammada muddada uu mid kastaaba u arko in ay lagama maarmaan u tahay ee la xiriirto difaaca gobolkooda iyaga oo aan wax kale isku mashquulineynin, in ay marka hore aay ogolaansho ka helaan maehee maamulka milatariga laftiisa.

Qod. 5

Inta lagu guda jiro muddada hawlaha mutadawacnimada, muwaadhiniinta hubaysan waxay hoos imaanayaan sharciyada iyo xeerarka ciidammada.

Qod. 6

Laga bilaabo maalinta ay u soo diyaar garobaan hawlaha mutadhawacnimada waxay xaq u leeyihiin raashiin kaash ah ama nooc u dhigma 2 sh, so. maalintii.

Qod. 7

Haddii ay dhacdo dhimasho ama dhaawac dagaal ee mutadhawiciinta, waxaa lagu maamulayaa qodobbo la mid ah sida qodobbada lagu maamulo ciidammada.

Qod. 8

Marka laga reebo sida lagu sheegay qodobbadii hore 6 iyo 7, mutadhawiciintu wax xaq ah uma laha magdhow ama karti kale.

Qod. 9

Kharashka waxaa laga bixinayaa cinwaanka 6-aad ee miisaaniyadda wasaaradda gaashaandhigga oo uu u soo celin doono wasiirka maaliyadda.

Qod. 10

Xeerkan si degdeg ah ayu u dhaqan galayaa, wawaana la horgelyn doonaa golaha shacbiga si loogu beddelo xeer-sharci sida waafaqsan qod. 63aad ee dastuurka.

Muqdisho, 6 luulyo 1964.

Aden Abdulla Cismaan

R/wasaare

Abdirizak Hagi Husseen

Wasiirka Gaashaandhigga

Aden Issak Ahmed

Wasiirka Maaliyadda

Cawil Hagi Abdullahi Faarax